**XEER L. 163 rep.**

**MAAMULKA WALAAYADDA EE SOOMAALIYA**
**MAAREEYUHU**

MARKUU ARKAY sharciga lambar 4 soona baxay nobembar 1951, n. 1031, kaas oo ansaxinaya heshiiska ilaalinta dhulka Soomaaliya ee hoos yimaada maamulka Talyaaniga oo siiyanaya awood fulineed buuxda;

MARKI UU ARKAY nadaaminta n. 12, soona baxay taariikhda juun 30, 1951, oo lagu aasaasay golaha caafimaadka Soomaaliya;

ASAGA OO TIXGELINAYO baahida loo qabo in la sameeyo dugsi loogu talagalay tababbarka shaqaale dumar ah oo u dhashay dhulka ee farsamo ahaan loo tababarayo in ay ku bartaan xirfadda umulisonimada;

MARKI UU DHAGEYSTAY aragtida Golaha Caafimaadka;

**WUXUU XEEREEYAY**

**Qod. 1**

Waxa Muqdisho laga asaasay, gudaha cisbitaalka Martiini, dugsi loogu talagalay dadka degaanka, oo loogu magac daray “ dugsiga umulisooyinka".

**Qod. 2**

Waxa ansixiyey “nadaam habeynaya dugsiga umulisooyinka” kaasoo hagaya shaqada dugsiga laftiisa.

**Qod. 3**

Kharashka la xiriira waxaa lagu dallici doonaa Cutubka 40aad ee 1951-52, iyo cutubyada u dhigma sannadaha soo socda.

Muqdisho, 23 Disembar 1951.

MAAREEYE

**Fornari**

**HABEYNTA DUGSIGA UMULISOOYINKA**

**Qod. 1**

“Dugsiga umulisooyinka” waxa uu ku yaalaa Muqdisho cisbitalka martini dhexdiisa, waxaana ka masuul ah Maamulaha cisbitaalka.

**Qod. 2**

Dugsiga waxa uu leeyahay seddax wareeg waxbarasho sannadkiiba, kuwaas oo midwalba soconaya toban bilood, ayna xigeyso laba bilood oo fasax ah.

Dowrad kasta suurto gal ma aha in loo ogolaado 15 arday ka badan.

**Qod. 3**

Waxa la aqbalayaa dadka soo codsada buuxiyana shuruudaha soo socda:

a) cumriga waa in uusan ka yareyn 18 jir, kana badneyna 30;

b) caafimaad qab, xoog iyo in aysan qabin cudurro ka hor istaagi kara howsha umulisonimada;
c) in ay wanaag iyo xilkasnimo ku tilmaaman tahay.

**Qod. 4**

Murashixiinta loo golaanayo dugsiga waa in ay ku gudbaan imtixaanka dhaqanka guud iyo ku habboonaanta.

Guddiga imtixaanka oo qiimeyntoodu tahay kama dambeys iyo looma noqdaan, waxa uu ka kooban yahay madaxa caafimaadka, maamulaha cisbitaalka Martiini, caafimaad yaqaan uu soo magacaabo madaxa xafiiska caafimaadka iyo wax baridda dadweynaha ee maamulka talyaaniga ee loo aaminay maamulidda soomaaliya, iyo sarkaal (ahna xoghaye) uu soona magacaabayo asagaba madaxa xafiiska caafimaadka iyo waxbaridda dadweynaha.

**Qod. 5**

Ardayda loo aqbalay dugsiga umulisooyinka waxa ay ku qasban yihiin in ay ka shaqeeyaan qaybta dhalmada. Maalim walba oo shaqo waxa la siinayaa gunno 2.50 sh. So. ah, marwalba inta aysan noqon kuwo ow shaqaaleysiisay maamulka talyaaniga ee loo aaminay maamulidda soomaaliya, si kastaba waa loo wadayaa in la siiyo gunnada ku saabsan darajada ay joogaan.

**Qod. 6**

Ardaydu waa inay ku gudbaan, dhamaadka wareegga waxbarashada sanadeeka kasta, imtixaan ku saabsan barnaamijka barista sannadkaas.

Dhamaadka wreegga waxbarashada saddexaad, ardayda ay caddaato inay ku haboon yihiin waxay raacanayaan dibloomada umulisonimada.

Gudiga imtixaanka, oo qiimeyntoodu tahay laguma noqdaan iyo kama dambeys, waxa uu ka kooban yahay Kormeeraha Caafimaadka (Guddoomiye), Maamulaha Dugsiga umulisooyinka, xirfad yaqaan caafimaad oo uu magacaabo Madaxa Xafiiska Caafimaadka iyo waxbarashada dadweynaha ee MTMS, iyo sarkaal sidoo kale uu u magacaabayo Madaxa Caafimaadka iyo Waxbarashada Dadweynaha oo waliba qabanaya shaqada xoghaye.

**Qod. 7**

Ardayda aan gudbin imtixaanka sannadlaha ah qaybta 1aad ama qaybta 2aad waa laga reebayaa dugsiga. Ha yeeshee guddiga imtixaanka waxa ay soo jeedin karaan in ardayda ay ku celiyaan wareegga waxbarasho mar kale, iyada oo aan wax loo dhimeynin qodobka 2aad, I Cpv.

Ardayda aan gudbin imtixaanka kama dambeysta ah ee wreegga seddaxaad ee waxbarashada waxa ay leeyihiin __qiimeynta guddiga imtixaanka__ in loo ogolaado in ay ku soo celiyaan wareeggii seddaxaad ee waxbarashada, iyada oo aan wax loo dhimeynin habka ku tilmaaman qodobka 2aad, I Cpv.

**Qod. 8**

Barnaamijka waxbaridda umulisada ee dugsiga waxaa ka mid ah:

1) Sanadka Koowaad.
   a) afkaarta aasaasiga ah ee jirka qaybahiisa;
   b) afkaarta aasaasiga ah barashada nadaamka jirka iyo barashada cudurrada;
   c) afkaarta fayadhowrka, nadaafadda iyadoo la tixgalinayo barashada asalka cudurrada iyo ka hortagga cudurada aan dhaqaatiir loo heyn;
   d) barashada jirka, iyo xiriirka jirka ee habdhiska xubnaha taranka;
   e) barashada uurka, dhalashada, xannaanada cunugga, iyo naasnuujinta.

2) Sannadka 2aad

a) barashada cudurrada uurka, dhalashada, nifaaska, iyo naasnuujinta, ka hortagga cudurrada dhidiidka keena iyada oo si ku meel gaar ah loo eegayo xab soo baxa iyo kuwa ah cudurrada daahay ee bakteeriyada, daafka iyo waraabowga ee Baltic

b) barashada barista caafimaadka jiifaha sariirta ee haweenka uurka leh iyo kuwa dhawaan dhalay;

c) barashada waajibaadka umuliso ee ku aaddan maamulka dadweynaha iyo garsoorka.

3) Sannadka saddexaad.

a) barashada barista caafimaadka jiifaha sariirta ee haweenka uurka leh iyo kuwa dhawaan dhalay;

b) baaridda dhammaan shaqooyinka socda ee loo ogol yahay umulisada;

c) sida loo diyaariyo howl lagama maarmaan u ah fulinta ficil qalliin ah;

d) barashada kaalmeynta hooyooyinka;

e) barashada siinta dawada;

f) dhayidda;

g) barashada gargaarka degdegga ah;

h) afkaarta hagaajinta dhalmada iyo daryeelka ubadka.

Waxbariddu waa akhrin iyo gacan ka shaqeyn, laakiin si si ballaaran u muujinaya sharraxaad.

**Qod. 9**

Duruusta waxa ay u baxeysaa shaxda uu u dejiyo Madaxa Xafiiska Caafimaadka asaga oo tixgelinayo tala bixinta Maamulaha Dugsiga.

Billowga iyo dhammaadka dowro sannadeed walba waxa xaddidayo Madaxa Xafiiska Caafimaadka.

*Arkay, waa la oggalaaday*

MAAREEYE
**Fornari**